Governor's Office of the Education Ombuds

3518 Fremont Ave. N., #349
Seattle, WA 98103
Telefoonka Lacag La'aanta: 1-866-297-2597

www.oeo.wa.gov
Email: oeoinfo@gov.wa.gov
Faks: 1-844-886-5196

La shaqeynta Xafiiska Dhexdhexaadinta Waxbarashada ee Guddoomiyaha Gobolka Washington

Waad ku mahadsan tahay in aad la soo xariirtay Xafiiska Dhexdhexaadinta Waxbarashada Guddoomiyaha Gobolka Washington (OEO). Waxaan ku faraxsanahay in aan kula shaqeyno. Boggaan waxaa laga helaa macluumaad muhiiim ah oo ku saabsan waxa aad filan kartid marka aad la shaqeysid xafiiskena. Waxaan fududeeyna isgaarsiinta iyo iskaashiga xalinta dhibaatada, laakin ma nihin hay'adda fulinta.

Shaqaalaha OEO waxay ka kooban yahiin 5 Dhexdhexaadinta Waxbarashada oo la shaqeeyo qoysaska iyo dugsiyada gobolka si loo xalliyo dhibatooyinka saameeya waxbarashada ardayga.

OEO waa wakaalad **madax banaan oo ku baahsan gobolka**.

Adeegyadena waa:

- ✓ **LACAG LA'AAN**
- ✓ **QARSOODI** iyo
- ✓ Waxaa heli kara **qoysaska, tababareyaasha** iyo **dadka kale** ee qaba su'aalaha ama arrimaha saameeya CUNUG KASTA oo taga ama xaq u leh in uu tago **dugsiyada dadweynaha K-12 ee Gobolka Washington**.

Dhexdhexaadinta Waxbarashada waxa ay samayso:

- Waa dhageysataa si ay u fahamto su'aalahaada iyo arrimaha la xariira ardayda;
- Waxay bixisaa macluumaad ku saabsan hawlaha dugsiyada dadweynaha iyo xuquuqda iyo mas'uuliyadda saaran ardayda iyo waalidiinta;
- Waxay la tashataa qoysaska, tababareyaasha iyo dadka kale xagga talooyinka suurtogalka ah ee lagu xalliyo dhibatooyinka saameeya waxbarashada ardayga;
- Waxay dadka la wadaagtaa aragtida iyo fikradaha madax banaan si loo helo isgaarsiin dhab ah;
- Waxay bixisaa taageero iyo tababar ku saabsan shaqada iyo qilaafka si loo taageero waxbarashda ardayga;
- Waxay u dooddaa hawlaha xaqa iyo natiijooyinka u wanaagsan ardayda; iyo
- Kiisaska qaar, marka ogolaasho qoran horay looga soo qaato waalid ama ilaaliyaha sharciga, waxay si toos u faragelisaa dugsiga iyo/ama dagmada si ay u xalliso arrimaha.

Isgaarsiinta la OEO waa qarsoodi, iyo OEO ma muujin doonaa macluumaad ku saabsan Yeedhe ama ardayga oo aan marka hore laga helin ogolaansho qoraal ah ka waalidka ama ilaaliyaha sharciga ama ardayga qaangaarka ah. Haddii OEO ogolaansho qoraal ah helo, Dhexdhexaadinta Waxbarashada waxaa laga yaabaa in ay isku dayaan in ay caawiyaan si loo caddeeyo loona xaliyo arrimaha si toos ah ula xariirayso dugsiga ama shaqaalaha degmada. Sababo ku xiran khayraadka, Dhexdhexaadinta Waxbarashada mar dhif awoodi doonaan inay ka qayb galaan shirarka qof ahaan ama taleefanka, laakiin way ka fiirsan doonaa xaaladaha kooban iyo mid ka mid ah shirka oo kaliya sidaas samaynaya, si ay u caawiyaan sahlo fahamka iyo wax ku ool ah xiriirka ka dhexeeya qoysaska iyo dugsiyada.

Dhexdhexaadinta Waxbarashada Ma:

- Bixiso la-tallinta sharciga ama mattalaadda;
- U shaqeeyso sidaa u doodeyaasha waalidka;
- Fulliso baaritaano rasmi ah ama gaarto go'aano; ama
- Laha awood ay dugsiyada ama dagmooyinka uga dalbato in ay qaadaan ama in aysan qaadin talaabo gaar ah.

Governor's Office of the Education Ombuds

3518 Fremont Ave. N., #349
Seattle, WA 98103
Telefoonka Lacag La'aanta: 1-866-297-2597

www.oeo.wa.gov
Email: oeoinfo@gov.wa.gov
Faks: 1-844-886-5196

OEO ma ballan qaadi karto natiijado khaas ah hase ahatee waxaan si joogto ah uga shaqeyn doonaa in aan fahamno arrimaha aad qabtid, waxaan wadaagi doonaa macluumaad munaasib iyo sax ah, iyo waxaan aqoonsan doonaa fursadaha sida wadajirka ah loogu xalliyo dhibatooyinka si loo taageero ardayda. Sida aynu nahay hay'ad gobol oo yar, waxaan isku dayna ina shaqeeyno si cadaalad ah ee khayraadka qudahood. Dhexdhexaadinta Waxbarashada ma ku siin karo kaalmo muddo dheer ah oo ku saabsan arrimaha shaqsi.
Sabab la xiriirto shaqaalaha xadidan, waxaa kaliya oo noo suurtogaleyso inaan la shaqeyno ardayga/qoyska gaarka ah hal jeer sannadkiiba, oo ay la jiraan ugu badnaan 120 maalmood ee arimaha quseeya qorshaha xeeladeena.

Ruqsadda Lagula Xariiro Dugsiga iyo Dagmada

OEO waxay xushmad u haaysaa asturnaantaada iyo asturnaanta ardaygaada. Wada hadalada aan kula yeelanay waa qarsoodi. Haddii uusan sharciga kaa dalbanin in aad sidaas sameysid, cidna lama wadaagno macluumaadkaada ama macluumaadka ardaygaada haddii aadan bixinin ogolaasho qoran.

Kaddib marka aad la hadashaan Dhexdhexaadinta Waxbarashada, haddii labada dhinac raali ku noqdaan in ay habboon tahay in Dhexdhexaadinta Waxbarashada ay dugsiga ama dagmada kala xariirto cunugaada, Dhexdhexaadinta waxay marka hore u baahan tahay ogolaashadaada oo qoran.

- **Haddii aad rabtid in Dhexdhexaadinta awood u yeelato in ay la xariirto dugsiga cunugaada iyo/ama dagmada, fadlan akhri, saxiix kaddibna soo celi foomkaan.**
- **Waxaad koobi saxiixan u dirtaa OEO kuna soo dir boostada cinwaanka kore, ama emailka OEOinfo@gov.wa.gov, ama faks ahaan 1-844-886-5196.**

Taariikhda maanta _____

( ) Aniga waxaan ahay ( ) waalidka ama ( ) ilaaliyaha sharciga ardayga hoos ku qoran.

( ) Aniga waxaan ahay ardayga iyo waxaan jiraa 18 sanno ama ka badan.

Waxaan fahamsanahay in Xafiiska Dhexdhexaadinta Waxbarasxhada ila shaqeeyo sida dhinac saddaxaad, madax banaan, dhexdhexaad ah oo iskudaya in uu xalliyo arrimaha la xariira waxbarashada ardaygeyga, iyo in Dhedhexaadinta Waxbarashada aysan sharci ahaan bixinin matalaad ama talo.

Aniga waxaan Xafiiska Dhexdhexaadinta Waxbarashada iyo shaqaalaha dugsiga/dagmada siiyay ruqsad ay uga hadlaan xaaladeyda iyo in ay isticmaalaan magaca ardaygeyga iyo macluumaadka kale ee munaasabka ah lagana yaabo in ay ku jiraan diiwaanka waxbarashada si loo kaalmeeyo xallinta arrimaheyga/dhibatooyinkeyga.

_____ _____
Magaca Dugsiga Dagmada **Magaca Dugsiga**

_____ _____
Magaca ardayga **Taariikhda dhalashada ardayga**

_____
Magaca Waalidka/Ilaaliyaha Sharciga

_____ _____
Saxiixa waalidka/ilaaliyaha sharciga *AMA* **Saxiixa ardayga (Haddii uu jiro 18 sanno ama ka badan)**